

8. Eebana (Khayr) ka rajee.

وَإِلَيْ رَبِّكَ فَازَغَبَ ﴿٨﴾

Eebe wuxuu Nabiga (naxariis iyo nabadgallyo korkiisa Eeba ha yeelee) ku mannaystay wanaag badan, sida Laabta oo loo Nuuray, Culayska oo laga dajiyay, iyo Magaciisa oo la kor yeelay, wuxuuna Eebe sheegay in cidhiidhi kasta faraj ku dhawayahay, wuxuuna faray in ducada iyo khayrkana lagu dadaalo, Eebana wanaag laga rajeeyo.

Qataada waxaa laga warriyay in loo sheegay in Rasulkii Eebe, «Naxariis iyo Nabadgallyo korkiisa ha yeelee» Asaxaabtiisi ugu bishaareeyay Aayaddan yidhina: «Hal cidhiidhi kama adkaado laba fudayd». Waxaa wariyay Ibnu Jariir. Ash-Sharx (1-8).



Magaca Eebe yaan ku billaabynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Tiinka iyo Zeytuunka.
2. Iyo Dhuuri Siina.
3. Iyo Magaaladan Aaminka ah (Maka).
4. Ee waxaana ku abuuray Dadka Muuqaal toosan.
5. Kaddibna waxaan u celinaynaa hoos (gabow dartiis).
6. Hase yeeshee kuwa rumeeeyey xaqaa camalwanaagsanna falay, waxay mu-dan Ajri aan go'aynin.
7. Ee Maxaa Gaalada u sababay bee-ninta Qiyaamada intaas ka dib.
8. Miyusan Eebe ahayn kan ugu xukun wanaagsan. (Eebaa xukun wanagan).

Suuraddani waxay ka Warrami sida Eebe u Abuuray Dadka, una Wanaajiyey Abuurkiisa, hadana ugu Celin Gabow iyo Tabar yari Ciddii Cimrida, Eebana wuxuu ku Abaal marin kuwa Wanaagga Falay Wanaag iyo Ajiraan Dhamaanayn, Eebana waa kan Xukunkiisu Caadilka iyo Xaqa yahay uguna Fiicanyahay.

Abuu Hureere waxaa laga warriyey: Hadduu mid idinka mid ah Akhriyo Suuraddan iyo Dhamaadkeeda ha yiraahdo:

waxaan ka mid ahay kuwa Marag Furi. At-Tiin (1-8).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

وَالَّذِينَ وَأَرْتَنُونَ ﴿١﴾

وَطُورِسِينَ ﴿٢﴾

وَهَذَا الْبَلَدُ الْأَمِينُ ﴿٣﴾

لَقَدْ خَلَقْنَا إِلَانِسَنَ فِي أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ ﴿٤﴾

ثُمَّرَدَدْنَاهُ أَسْفَلَ سَنَنِينَ ﴿٥﴾

إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ فَلَهُمْ أَجْرٌ

غَيْرُ مُتَنَوِّنٍ ﴿٦﴾

فَمَا يُكَبِّكُ بَعْدُ بِالَّذِينَ ﴿٧﴾

أَلَيْسَ اللَّهُ بِأَحْكَمُ الْحِكْمَاتِ ﴿٨﴾